Croup

# Gawracatada

Somali

Gowracatadu waa xaalad ay keento infagshan fayras ah. Fayrasku wuxuu keenaa bararka sanduuqa codka (larynx) iyo hawo-mareenka (trachea). Bararkan wuxuu ka dhigaa hawa - marinka, mid ciriiri ah markaana way adag tahay in la neefsado. Carruurta leh gawracatada waxay yeeshaan qufac adag, oo xabeeb leh, waxayna samayn karaan dhawaaq cod dheer ah, markay neefsadaan (stridor).

Gowracatada waxay inta badan saameysaa carruurta u dhaxeysa lix bilood ilaa shan sano, laakiin waxay saameyn kartaa carruurta waaweyn. Carruurta qaarkood wuxuu ku dhici karaa dhawr jeer.

Gowracatadu si degdeg ah ayuu uga sii dari karaa. **Haddii ilmahaagu qabo dhibaato xagga neefsashada, raadso daryeel caafimaad oo degdeg ah.**

## Astaamaha iyo calaamadaha gowracatada

- Gowracatadu caadi ahaan waxay u bilaabataa sida hargabka caadiga ah, tusaale ahaan qandho, sanka oo dareera iyo qufac.
- Qufaca ilmahaagu waa isbedeli doonaa si uu u noqdo mid xabeeb ah oo dhawaaqaya, oo laga yaabo inuu u e'g yahay codka kalluunka loo yaqaan siilka (seal).
- Codka ilmahaagu wuxuu noqon karaa mid xabeeb ah.
- Markuu ilmahaagu neefsado, waxay sameyn karaan gurxan, cod qeylo dheer, oo loo yaqaan xabeeb.
- Xaaladaha daran ee gowracatada, maqaarka u dhexeeya feeraha ilmaha ama qoortooda hoosteeda waxay u libiqdaa hoos markay neefsadaan, waxaana laga yaabaa inay ku adkaato inay neefsadaan.

Gowracatadu badanaa waxay ku bilaabataa digniin la'aan, badhtamaha habeenkii. Calaamaduhu badanaa way ka sii daraan habeenkii, waxayna kuwa ugu xun yihiin habeenka labaad ama saddexaad ee xanuunka. Astaamaha iyo calaamadaha gowracatada waxay socon karaan saddex ilaa afar maalmood; Si kastaba ha ahaatee, qufacu wuxuu socon karaa illaa saddex toddobaad. Xabeebtu waa inaysan sii socon.

## Daryeelka guriga ah

Weerarka fudud ee gowracatadu waa marka uu ilmahaagu leeyahay qufac xun oo dhawaaq leh, laakiin qufac aan laheyn xabeeb marka uu degan yahay oo dejisan yahay, oo aysan dhibayn neefsashadu. Ma jirto daaweyn caafimaad oo lagama maarmaan u ah gowracatada khafiifka ah, ama fayruska keenay. Caadi ahaan waxaad ku maareyn kartaa gowracatada khafiifka ah guriga adoo raacaya daryeelka soo socda:

- Ilmahaaga ka dhig mid degan, maaddaama neefsashadu badanaa sii adag tahay markuu kacsan yahay - ilmahu intii uu kacsan yahayba, way sii xumaan karaan astaamahooda. Isku day inaad si tartiib ah u fadhiisiso, uu akhriyo buug, ama uu daawado TVga.
- Haddii ilmahaagu qabo qandho oo uu xanaaqsan yahay, waxaad siin kartaa paracetamol ama ibuprofen. Fiiri xaashideena macluumaad: Dejiyaha xanuunka carruurta – Paracetamol iyo ibuprofen (rch.org.au/kidsinfo/fact_sheets/Pain_relief_for_children)
- Gowracatadu badanaa way ka sii dartaa habeenkii. Carruur badan ayaa is-dejin doona haddii qof uu la joogo.

Uumi samay-yayaasha iyo qoyaan-bixiyeyaasha looguma talinayo daaweynta. Ma jiraan wax caddayn ah oo muujinaya inay faa'iido u leeyihiin.

## Goorta la arkayo dhaqtarka

**Waa inaad isla markiiba wacdaa ambalaas haddii:**

- ilmahaagu uu dhibaato ku qabaa neefsashada
- ilmahaagu wuxuu u muuqdaa mid aad u xanuunsan wuxuuna noqdaa mid liidasho iyo wareer ka muuqdo
- bushimaha ilmahaagu waa kuwo buluug ah
- ilmahaagu wuxuu bilaabaa inuu dhareero ama uusan wax liqi karin.

**Waa inaad aragto dhaqtarka haddii:**

- ilmahaagu uu ka yar yahay lix bilood uuna leeyahay calaamadaha iyo astaamaha gowracatada
- ilmahaaga lafta sakaarkiisa ama maqaarka u dhexeeya feerahiisa aya ku libdha markay neefsanayaan
- ilmahaagu wuxuu leeyahay xabeeb markuu nasan yahay

- ilmahaagu aad buu u xanuunsan yahay ama calaamadahooda ayaa sii xumaanaya
- waxaad ka walwalsan tahay sabab kale.

Haddii ilmahaagu uu leeyahay gowracato fudud oo soconaysa in ka badan afar maalmood, ama haddii xabeebto soo noqnoqto kadib marka ilmahaagu uu ka soo bogsoodo gowracatada, u qaad dhaqtarka

Dhaqtarkaaga ayaa kuu qori kara steroids (tusaale ahaan, prednisolone ama dexamethasone) si afka looga qaato. Isticmaalka steroids wuxuu ka caawiyaa inuu yareeyo bararka marinka hawada, taasoo neefsashada ka dhigeyso mid sahlan. Antibiyootikadu kuma shaqeeyaan fayraska mana la siiyo carruurta qabta gowracatada.

Haddii ilmahaagu qabo gowracatada daran, waxay u baahan doonaan inay joogaan isbitaalka, halkaas oo si dhow loola socon doono.

## Sidee bay gawracatadu u faaftaa?

Gawracatadu waa fal-celin fayrus ah, oo aan ahayn fayraska nafteeda, sidaa darteed carruurtu 'ma qaadi karaan' ama ma faafin karaan gawracatada. Si kastaba ha noqotee, fayraska sababay gawracatada ayaa si fudud ugu faafi kara qof ilaa qof kale marka la qufacayo ama hindhisayo. Haddii ilmahaagu leeyahay gawracato, waa inaad ka joojisaa dugsiga iyo xanaanada ilmaha intay jiran yihiin si aysan u faafin fayraska keena gawracatada. Gacmaha oo si joogta ah si fiican loo dhaqo ayaa looga hortagi karaa faafidda fayrasyada.

## Qodobbada muhiimka ah in la xusuusto

- Ma jirto daaweyn lagama maarmaan u ah gowracatada khafiifka ah, ama fayruskii keenay.
- Gowracatada waxay ku fiicnaataa saddex ilaa afar maalmood.
- Isku day inaad ilmahaaga dejiso, sababtoo ah neefsashadu badanaa way ka sii adag tahay marka ilmahaagu kacsan yahay.
- Gowracatada si degdeg ah ayey uga sii dari kartaa. **Haddii ilmahaagu qabo dhibaato xagga neefsashada ah, raadso gargaar caafimaad oo degdeg ah.**
- Marka uu dhaco weerarka gowracatada ee daran, ilmahaagu wuxuu u baahan yahay in si dhow loogula socdo isbitaalka.

## Macluumaad dheeraad ah

- Macluumaadka Caafimaadka Ilmaha: Qandhada carruurta ku dhacda (rch.org.au/kidsinfo/fact_sheets/Fever_in_children)
- Macluumaadka Caafimaadka Ilmaha: Qufaca (rch.org.au/kidsinfo/fact_sheets/Cough)
- Dr Margie: Sida loo aqoonsado noocyada kala duwan ee qufaca carruurta (blogs.rch.org.au/drmargie/2015/06/16/how-to-recognise-the-different-types-of-cough-in-children)
- U tag dhaqtarkaaga ama waaxda deg-degga ah ee isbitaalka ee degaanka

VICTORIA State Government

Waxaa soo diyaariyay The Royal Children's Hospital isagoo taageero ka helaya Dawlad-goboleedka Victoria Government rch.org.au/kidsinfo

**Dib-u-eegidda 2018**

Kids Health Info waxaa taageera The Royal Children's Hospital Foundation. Si aad ugu deeqdo, ka eeg rchfoundation.org.au

Afeefta

Macluumaadkani maaha inuu beddelo wada hadalka dhaqtarkaaga ama xirfadlaha daryeelka caafimaadka. RCH wuxuu sameeyey dadaal macquul ah si loo hubiyo in macluumaadkani uu sax yahay wakhtiga daabacaadda. RCH kama ahan mas'uul wixii khalad ah, isfaham la'aan, ama guusha daaweyn kasta oo lagu xusay qoraalladan. Macluumaadkan si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa. Had iyo jeer hubi oo hubi in aad haysato macluumaadkii ugu dambeeyey.